HAGIDA BEDELKA DUNIDA

Safar Maskaxeed ku Saabsan Isbeddel, horumar, iyo Hoggamin, Mas’uul ah.

QORAAGA BUUGA

HUSSEIN ABDIRAHMAN, B.S.

HIBAYN

Buuggan ganacsiga iyo horumarinta maskaxda
waxaan u hibaynayaa **hooyaday iyo aabbahay qaaliga ah**
ee dunida ka geeriyooday.
Iyaga ayaan ka dhaxlay adkaysi, dulqaad,
iyo rabitaanka inaan nolol sharaf leh dhisto.
Casharrada, guulaha iyo khaladaadka
aan ka baranayo ganacsigan,
Ilaahay ha uga dhigo ajar u socda.
Ilaahay ha u naxariisto, ha u dambi dhaafo,
ha ka yeelo Jannatul Firdows,
hana iga yeelo mid ducadoodu ku faa'iido.

Aamiin.

MAHADNAQ

Mahad oo dhan waxaa iska leh **Ilaahay SWT**,
kan i siiyay fursad, faham, iyo adkaysi
aan ku barto ganacsiga iyo horumarinta maskaxda.
Waxaan mahad gaar ah u jeedinayaa
hooyaday iyo aabbahay Alle u naxariisto,
kuwaas oo i baray sabir, dadaal, iyo in aanan quusan
Sidoo kale, waxaan u mahadcelinayaa
dhamaan macallimiinta, ganacsatada, iyo dadka aqoontooda la wadaagay,
kuwaas oo igu dhiirrigeliyay in guusha
ay ka timaaddo edbin, qorshe, iyo maskax adag.
Sido kale Waxan u Mahadcelinaya Walalkey Dr Abdihakim Mohamed.

Buuggan iyo casharrada ku jira
waxaan rajaynayaa inuu noqdo mid faa'iido u leh
qof kasta oo doonaya inuu dhiso Isbeddel horumar
oo ku saleysan aqoon, dulqaad, iyo anshax.
Ilaahay ha naga yeelo kuwo aqoonta ku camal fala,
kana dhiga mid noo horseeda guul adduun iyo aakhiro.

TUSMADA BUUGA

HAGIDA BEDELKA DUNIDA 1

QORAAGA BUUGA 2

HIBAYN 3

MAHADNAQ 4

HORDHAC 12

CUTUBKA 1: FAHAMKA ISBÉDDDELKA DUNIDA 18

1.1 Isbeddel Waa Maxay? 18

1.2 Taariikhda Isbeddellada Waaweyn 18

1.3 Maxaa Isbeddelka Maanta Ka Dhigay Mid Ka Duwan? 19

1.4 Isbeddel iyo Cabsi 20

1.5 Doorka Qofka ee Isbeddelka 20

1.6 Isbeddel La Fahmay vs Isbeddel La Diiday 21

1.7 Gunaanad 21

CUTUBKA2:MASKAXDA AADANAHA IYO ISBÉDDDELKA ... 22

2.1 Maskaxdu Waa Meesha Isbeddelku Ka Bilaabmo 22

2.2 Fikirka iyo Hab-dhaqanka 22

2.3 Cabsida: Cadowga Isbeddelka 23

2.4 Awoodda Caadooyinka 23

2.5 Maskaxda Dhibanaha vs Maskaxda Mas'uulka..... 24
2.6 Barashada iyo Isbeddelka Maskaxda..... 24
2.7 Maskax Furan iyo Hoggaamin 24
2.8 Maskaxda: Xarunta Isbeddelka Dhammaan 25
2.9 Sida Fikraduhu u Dhismaan 25
2.10 Qaladka Ugu Weyn ee Dadku Galaan..... 26
2.11 Cabsida iyo Sheekada Maskaxda 26
2.12 Caadooyinka Maskaxda Lagu Dhiso 27
2.13 Maskaxda Dhibanaha: Xabsi Aan La Arag 27
2.14 Maskaxda Koraysa (Growth Mindset) 28
2.15 Layli Maskaxeed: Isbeddelka Bilowgiisa 28
2.16 Hoggaaminta Nafta 29
2.17 Gunaanad Cutubka 2 29
CUTUBKA 3: HAMI, RIYO IYO UJEEDDO NOLOLEED..... 30
3.1 Hami Waa Maxay?..... 30
3.2 Riyooyinka: Bilowga Safarka. 30
3.3 Ujeeddo Nololeed: Sababta Aad U Jirto. 31
3.4 Khaladaadka Caamka ah ee Laga Galo Hami iyo Riyo. 31
3.5 Hami Xaddidan iyo Hami Ballaaran. 32

3.6 Xiriirka u Dhexeeya Hami iyo Anshax. 32
3.7 Qorsheynta Hamiga. 33
3.8 Hami iyo Dulqaad. 33
3.9 Layli Nololeed: Helidda Ujeeddadaada. 34
3.10 Gunaanad Cutubka 3 34
CUTUBKA4: ANSHAXA IYO MAS'UULIYADDA 35
4.1 Anshax Waa Maxay? 35
4.2 Anshaxa Qofka iyo Anshaxa Bulshada. 35
4.3 Mas'uuliyad: Culays Mise Sharaf? 36
4.4 Anshax La'aan iyo Burbur. 36
4.5 Hoggaamiye Anshax Leh. 37
4.6 Anshax iyo Go'aan Qaadasho. 37
4.7 Anshax iyo Jiilka Soo Koraya. 37
4.8 Isku-dheellitirka Anshax iyo Hami. 38
4.9 Layli Nololeed: Qiimeynta Anshaxa Qofka. 38
4.10 Gunaanad Cutubka 4 38
CUTUBKA5:HOGGAAMINTA ISBÉDDDELKA 39
5.1 Hoggaamin Waa Maxay? 39
5.2 Hoggaamiye Ma La Dhashaa Mise Waa La Noqdaa? 39

5.3 Aragti: Laf-dhabarta Hoggaaminta..... 40
5.4 Hoggaaminta Adeegga (Servant Leadership) 41
5.5 Kalsoonida iyo Daacadnimada..... 41
5.6 Hoggaaminta Xilliyada Adag..... 42
5.7 Is-hoggaamin: Bilowga Hoggaaminta..... 42
5.8 Hoggaamiye iyo Mas'uuliyad Bulsho. 42
5.9 Khaladaadka Hoggaamineed ee Caamka ah. 43
5.10 Layli Hoggaamineed. 43
5.11 Gunaanad 44
CUTUBKA 6: AQOON, WAXBARASHO IYO TIGNOOLAJIYAD 44
6.1 Aqoontu Waa Awood. 44
6.2 Waxbarasho: Nidaam Mise Nolol? 45
6.3 Dhibaatada Waxbarashada Dhaqameed. 45
6.4 Tignoolajiyada: Fursad iyo Khatar. 46
6.5 Aqoonta Dijitaalka ah. 46
6.6 Tignoolajiyada iyo Anshaxa. 47
6.7 Doorka Dhalinyarada 47
6.8 Aqoonta Maxalliga ah iyo Tan Caalamiga ah..... 47
6.9 Waxbarasho u Adeegta Isbeddel..... 48

6.10 Layli Waxbarasho. 48
6.11 Gunaanad Cutubka 6 48
CUTUBKA 7: DHAQAALE, SABOOLNIMO IYO HAL-ABUURNIMO 49
7.1 Dhaqaaluhu Waa Nidaam Nololeed. 49
7.2 Saboolnimo:Dhib Dhaqaale Mise Dhib Maskaxeed? 49
7.3 Shaqo Abuur vs Shaqo Raadin. 50
7.4 Hal-abuurnimo: Furaha Dhaqaale Waara. 50
7.5 Dhaqaale ku Dhisan Anshax. 51
7.6 Maareynta Lacagta Qofka. 51
7.7 Doorka Ganacsiga Yaryar. 52
7.8 Dhaqaale Maxalli ah iyo Isku-filnaansho 52
7.9 Hal-abuurnimo Bulsho (Social Innovation) 52
7.10 Layli Dhaqaale. 53
7.11 Gunaanad Cutubka 7 53
CUTUBKA8:DHALINYARADA,IYO MUSTAQBALKA. 54
8.1 Dhalinyaro Waa Kuma? 54
8.2 Dhalinyarada iyo Jahwareerka Casriga 54
8.3 Aqoonsiga Dhalinyarada 55
8.4 Dhalinyarada iyo Waxbarashada 55

8.5 Dhalinyarada iyo Shaqo La'aanta 55
8.6 Dhalinyarada iyo Hoggaaminta 56
8.7 Dhalinyarada iyo Dhaqanka 56
8.8 Dhalinyarada iyo Teknoolajiyada 57
8.9 Doorka Bulshada iyo Waalidka 57
8.10 Layli Nololeed oo Dhalinyaro 57
8.11 Gunaanad Cutubka 8 58
CUTUBKA9:HAWEENKA,IYO ISBEDDELKA BULSHADA..... 58
9.1 Haweenku Waa Laf-dhabarta Bulshada 58
9.2 Sinnaanta iyo Cadaaladda 59
9.3 Waxbarashada Haweenka 59
9.4 Haweenka iyo Dhaqaalaha 59
9.5 Haweenka iyo Hoggaaminta..... 60
9.6 Caadooyin Waxyeello Leh 61
9.7 Haweenka iyo Teknoolajiyada 62
9.8 Haweenka iyo Nabadda..... 62
9.9 Doorka Ragga ee Isbeddelka 63
9.10 Layli Bulsho 63
9.11 Gunaanad Cutubka 9 63

CUTUBKA 10: MAS’UULIYADDA QOFKA IYO ISBEDDELKA DUNIDA 64
10.1 Isbeddelku Halkee Ayuu Ka Bilaabmaa?..... 64
10.2 Mas’uuliyad: Faham Ka Baxsan Eed 64
10.3 Qofka iyo Go’aamada Yaryar 65
10.4 Mas’uuliyadda Anshaxa 65
10.5 Qofka iyo Bulshada 65
10.6 Cabsi iyo Ka Baxsasho Mas’uuliyadeed..... 66
10.7 Qofka iyo Hoggaaminta 66
10.8 Isbeddel Waara: Samir iyo Dulqaad 66
10.9 Dhaxalka Qofka..... 67
10.10 Layli Mas’uuliyadeed 67
10.11 Gunaanad Cutubka 10..... 68

HORDHAC

Dunidu mar walba isbeddel ayay ku jirtay, balse isbeddelka maanta socda ma aha mid caadi ah. Waa isbeddel xawaare sare ku socda, saameynaya maskaxda, dhaqanka, dhaqaalaha, siyaasadda, diinta, iyo nolosha qof walba si toos ah ama si dadban. Qarnigan aan ku noolnahay, ma jiro qof ka caagan saameynta isbeddelka dunida, xitaa haddii uusan si buuxda u dareemin.

Buuggan Hagida Bédelka Dunida wuxuu ka dhashay su'aal weyn oo maskaxda igu dhalatay:

Sidee qof caadi ah uga noqon karaa qof saameyn leh, xilli dunidu ay u muuqato mid gacanta uga baxday dadkeeda?

Bulshooyin badan gaar ahaan kuwa soo koraya waxaa hareeyay caqabado waaweyn: saboolnimo, aqoon la'aan, hoggaan xumo, kala-qoqob, iyo rajo beel. Haddana isla bulshooyinkaas waxaa ku jira karti qarsoon, maskax firfircoon, iyo awood isbeddel keeni karta, balse aan si sax ah loo hagi karin.

Buuggan ma aha buug sheegaya in dunida hal mar la beddeli karo, mana aha buug riyooyin madhan ku dhisan. Waa buug ku dhisan faham, xaqiiqo, waayo-aragnimo, iyo aragti qoto dheer. Waa hagid u jeedda in akhristaha la tuso in isbeddelka dunida uu ka bilaabmo isbeddelka qofka.

Haddii qofku fahmi waayo naftiisa, ma fahmi karo bulshada. Haddii uusan qofku anshax yeelan, ma hoggaamin karo isbeddel. Haddii uusan qofku aqoon lahayn, ma abuuri karo horumar waara. Sidaas awgeed, buuggan wuxuu si gaar ah

diiradda u saarayaa dhismaha qofka, ka hor inta uusan ka hadlin dhismaha bulsho ama qaran.

Hagida Bédelka Dunida waa buug loogu talagalay:

Qofka raba inuu fahmo sababta dunidu u jahwareersan tahay

Dhalinyarada raadinaya jihada noloshooda

Hoggaamiyaha raba hoggaan ka duwan kan caadiga ah

Qof kasta oo aaminsan in wax la beddeli karo, xitaa marka xaaladdu adkaato

Buuggan wuxuu isku daraa:

Fikir maskaxeed

Aragti nololeed

Anshax iyo akhlaaq

Aqoon, waayo-aragnimo, iyo tusaalooyin dhab ah

Cutubyada buuggan kuma koobna talooyin kooban, balse waa qoraallo ballaaran, faahfaahsan, oo akhristaha gelinaya fikir qoto dheer. Cutub kasta wuxuu leeyahay ujeeddo, fariin, iyo waddo ficil ah oo la raaci karo.

Ujeeddada ugu weyn ee buuggan waa in akhristaha laga beddelo:

Qof cabanaya → qof fahmaya

Qof eedeynaya → qof mas’uul qaadaya

Qof daawanaya → qof ficil sameeya

Isbeddelka dunida ma aha hawl qof keliya qaban karo, balse wuxuu ku bilaabmaa qof keliya oo go’aan qaata. Buuggan wuxuu kuu yahay hagaha go’aankaas.

Haddii aad diyaar u tahay inaad fikirkaaga ballaariso, caadooyinkaaga dib u eegto, oo aad naftaada ka bilowdo isbeddel, markaas buuggan adiga ayuu kuu qoran yahay.

Dunida Isbeddelaysa

Dunidu ma joogto, marna ma istaagto. Qarni walba wuxuu leeyahay astaamo u gaar ah, balse qarnigan aan ku noolnahay wuxuu kaga duwan yahay qarniyadii hore xawaare, saameyn, iyo baaxad. Isbeddelka maanta socda waa mid si degdeg ah u gala nolol maalmeedka dadka, una beddela sida ay u fikiraan, u shaqeeyaan, una noolaadaan.

Teknoolajiyada, warbaahinta, iyo isku xirnaanta caalamiga ah waxay dunida ka dhigeen tuulo yar, halka fikrad kasta, war kasta, ama go'aan kasta uu si toos ah u taaban karo malaayiin qof. Hase yeeshee, horumarkaasi mar walba lama socdo hagid, anshax, iyo faham. Taasi waxay keentay jahwareer maskaxeed, kala fogaansho bulsho, iyo su'aalo waaweyn oo ku saabsan jihada nolosha aadanaha.

Dad badan waxay dareemayaan in dunidu ka horreyso, iyaguna ay gadaal ka joogaan. Qaar kale waxay u arkaan isbeddelka mid khatar ah, halka kuwo kalena ay u arkaan fursad. Farqiga u dhexeeya labadaas aragti ma aha nasiib, balse waa faham.

Buuggan wuxuu ku bilaabanayaa fahamkaas: in isbeddelka aan laga carari karin, balse la fahmi karo, lana hagi karo.

Dhibaatada Dhabta ah

Marka la eego caqabadaha dunida ka jira saboolnimo, dagaallo, cadaalad darro, shaqo la'aan, iyo burbur bulsho dad badan waxay ku mashquulaan eedeyn. Qaran ayaa la eedeeyaa, hoggaan ayaa la eedeeyaa, ama duruufo ayaa la eedeeyaa. Inkasta oo arrimahaasi door leeyihiin, haddana su'aasha dhabta ah waa:

Xaggee buu ka bilaabmaa isbeddelka runta ah?

Isbeddel kasta oo waara wuxuu ka bilaabmaa fikir. Fikirku wuxuu dhalinayaa go'aan, go'aankuna wuxuu dhalinayaa ficil. Marka fikradu khaldan tahay, ficilku wuu khaldamayaa, xitaa haddii ujeeddadu wanaag tahay.

Bulshooyin badan ayaa ku fashilmay horumar, ma aha aqoon la'aan keliya, balse hagid la'aan. Waxaa jira karti badan oo aan la isticmaalin, maskax badan oo aan la hanuunin, iyo dhalinyaro badan oo aan la fahmin.

Buuggan wuxuu si qoto dheer u falanqeynayaa halka dhibaatadu ka jirto, isaga oo ka fogaanaya hadallo guud, kuna dhagan xaqiiqooyin iyo aragti la taaban karo.

Qofka iyo Mas’uuliyadda.

Mid ka mid ah fariimaha ugu waaweyn ee buuggan waa in qofku uusan iska fogeyn mas’uuliyadda. In kasta oo duruufaha nololeed ay kala duwan yihiin, haddana qof walba wuxuu leeyahay door uu ka ciyaari karo isbeddelka.

Qofka caadiga ah mar walba ma fahmo awoodda ku jirta:

Fikirkiisa

Go’aankiisa

Anshaxiisa

Iyo ficilkiisa yar ee joogtada ah

Isbeddel weyn mar walba kama bilaabmo tallaabo weyn; mararka qaarkood wuxuu ka bilaabmaa go’aan yar oo sax ah.

Buuggan wuxuu akhristaha ku baraarujinayaa in hoggaamintu aysan ku xirnayn xil ama darajo, balse ay ku xirantahay:

Aragti

Kalsooni

Mas’uuliyad

Iyo adeeg

Qof kasta oo saameyn togan yeesha, wuxuu si toos ah ama si dadban u beddelaa dunidiisa.

Ujeeddada Buuggan

Hagida Bédelka Dunida ma aha buug lagu akhriyo hal mar oo la illoobo. Waa buug loogu talagalay in lagu noqnoqdo, lagu fekero, laguna dabaqo nolosha dhabta ah.

Ujeeddadiisu waa:

In akhristaha la siiyo faham qoto dheer

In maskaxda laga furo aragti cusub

In la dhiso qof ka hor inta aan la dhisin bulsho

In la abuuro jiil fakaraya, ficil sameeya, oo anshax leh

Buuggan ma siinayo jawaabo fudud su'aalo adag, balse wuxuu ku barayaa sida loo raadiyo jawaabaha saxda ah.

Baaq iyo Ballanqaad

Buuggan waa baaq. Baaq ku wajahan qof kasta oo dareemaya in wax ka qaldan yihiin, balse aan garanayn halka uu ka bilaabo. Waa ballanqaad ah in isbeddelku suurtagal yahay, haddii la helo faham, dulqaad, iyo ficil joogto ah.

Haddii aad buuggan gacanta ku haysato, taasi micnaheedu waa inaad ka mid tahay dadka aan ka quusan mustaqbalka. Buuggan adiga ayuu kula hadlaya, wuxuuna ku weydiinayaa hal su'aal oo keliya:

Adigu doorkee ayaad ka qaadan doontaa beddelka dunida?

CUTUBKA 1: FAHAMKA ISBÉDDDELKA DUNIDA

1.1 Isbeddel Waa Maxay?

Isbeddelku waa sharci ka mid ah sharciyada nolosha. Wax kasta oo nool ama jira, haddii uu joogo ama horumarayo, mar buu isbeddelayaa. Qofka diida isbeddelka wuxuu si tartiib ah u diidayaa koritaanka, halka qofka fahma isbeddelka uu furo albaab horumar.

Isbeddelku ma aha oo keliya wax muuqda sida teknoolajiyada ama siyaasadda; waa wax ka bilaabma maskaxda, kuna dhammaada ficilka. Qofku marka uu beddelo fikirkiisa, wuxuu si toos ah u beddelayaa noloshiisa. Taas awgeed, fahamka isbeddelka waa tallaabada ugu horreysa ee qofka iyo bulshada.

1.2 Taariikhda Isbeddellada Waaweyn

Haddii aan dib u milicsanno taariikhda aadanaha, waxaan arkaynaa in horumarka dunida uusan imaan si lama filaan ah. Wuxuu ku yimid isbeddello isdaba joog ah:

Helitaanka qoraalka

Horumarka beeraha

Kacaankii warshadaha
Iyo kacaankii teknoolajiyada

Isbeddel walba wuxuu lahaa dad hor kacay, dad diiday, iyo dad dhexda ka istaagay. Laakiin ugu dambeyn, taariikhdu waxay xustaa kuwa fahmay waqtigooda oo u diyaargaroobay.

Bulsho kasta oo ka gaabisay fahamka isbeddelka, waxay dib uga dhacday kuwa kale. Taariikhdu ma sugeyso qof ama qaran.

1.3 Maxaa Isbeddelka Maanta Ka Dhigay Mid Ka Duwan?

Isbeddelka maanta socda ma aha mid gaabis ah sida kuwii hore. Waa mid:

Degdeg ah
Isku xiran
Saameyn caalami ah leh

Hal fikrad oo ka dhalata meel fog ayaa saacado gudahood ku saameyn karta dunida oo dhan. Hal qalab oo cusub ayaa beddeli kara hab nololeed, dhaqaale, iyo xiriir bulsho.

Arrintan waxay fursad u tahay kuwa diyaar ah, balse waxay khatar ku tahay kuwa ka gaabiya fahamka.

1.4 Isbeddel iyo Cabsi

Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ka horyimaada isbeddelka waa cabsi. Dad badan waxay ka baqaan:

Wax cusub
Khalad sameyn
Ama inay lumiyaan waxa ay haysteen

Cabsidu waa caadi, balse marka ay xukunto go’aanka qofka, waxay noqotaa xannibaad horumar. Qofka fahma isbeddelka wuxuu bartaa sida cabsida loogu beddelo feejignaan iyo diyaar garow.

1.5 Doorka Qofka ee Isbeddelka

Isbeddelku mar walba kama yimaado dowlado ama hay’ado waaweyn. Mararka qaarkood wuxuu ka yimaadaa qof keliya oo go’aan qaata. Qofkaas ma aha mid kaamil ah, balse waa mid fahmay waqtigiisa.

Qof walba wuxuu leeyahay door:
Qofka wax baranaya
Qofka fikiraya
Qofka ficil sameynaya

Isbeddelka dunida wuxuu ka bilowdaa qofka go'aansada inuusan noqon daawade.

1.6 Isbeddel La Fahmay vs Isbeddel La Diiday

Waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya qofka fahma isbeddelka iyo qofka diida. Kan fahma:

- ❖ Wuu la qabsadaa
- ❖ Wuu ka faa'iideystaa
- ❖ Wuu hoggaamiyaa

Kan diida:

- ❖ Wuu ka harayaa
- ❖ Wuu cabanayaa
- ❖ Wuu eedeynayaa

Doorashadu mar walba waxay gacanta ugu jirtaa qofka.

1.7 Gunaanad

Cutubkan wuxuu akhristaha barayaa in isbeddelku uusan ahayn cadow, balse uu yahay fursad. Fahamka isbeddelka waa furaha dhammaan cutubyada kale ee buuggan.

Qofka aan fahmin isbeddelka dunida, ma fahmi karo doorkiisa nolosha. Laakiin qofka fahma, wuxuu yeelanayaa awood uu ku dhiso mustaqbal ka duwan kii hore.

CUTUBKA2:MASKAXDA AADANAHA IYO ISBÉDDDELKA

2.1 Maskaxdu Waa Meesha Isbeddelku Ka Bilaabmo

Isbeddel kasta oo nolosha ka dhaca, ha ahaado mid shaqsiyeed, bulsho, ama qaran, wuxuu marka hore ka bilaabmaa maskaxda. Qofka aan beddelin fikirkiisa, ma beddeli karo natiijada noloshiisa. Maskaxdu waa xarunta go'aamada, aragtida, iyo falcelinta qofka. Sida uu qofku u arko naftiisa, ayuu u arkaa dunida ku xeeran.

Dad badan waxay rabaan in xaaladooda dibadda isbeddelaan, iyagoo aan diyaar u ahayn inay gudaha wax ka beddelaan. Laakiin taasi waa rajo madhan. Maskax aan isbeddelin ma dhalin karto nolol isbeddelaysa.

2.2 Fikirka iyo Hab-dhaqanka

Fikirku ma aha erayo ku dhex wareega maskaxda; waa awood sameysa caadooyin. Marka fikrad la celceliyo, waxay noqotaa caado; caadaduna waxay noqotaa hab-nololeed. Sidaas darteed, qofka doonaya isbeddel dhab ah waa inuu dib u eegaa fikradaha uu maalin kasta ku noolyahay.

Waxaa jira laba nooc oo fikir ah:

Fikir xaddidan: "Ma awoodo", "Mar walba sidaas ayay ahaan jirtay", "Aniga igama suurtagasho".

Fikir furan: "Waxaan baran karaa", "Waan isku dayi karaa", "Wax walba waa la horumarin karaa".

Farqiga u dhexeeya labadaas fikir wuxuu go’aamiyaa jihada nolosha qofka.

2.3 Cabsida: Cadowga Isbeddelka

Cabsidu waa dareen dabiici ah, balse waxay noqotaa cadow marka ay xukunto go’aamada qofka. Dad badan waxay og yihiin waxa ay rabaan inay beddelaan, balse waxay ku xanniban yihiin cabsi:

cabsi fashil

cabsi hadal dadka

cabsi khalad

Cabsidu ma baabi’inayso kartida qofka; waxay kaliya qarisaa. Qofka fahma maskaxdiisa wuxuu bartaa sida cabsida loogu adeegsado digniin, halkii ay ka noqon lahayd xannibaad.

2.4 Awoodda Caadooyinka

Maskaxdu waxay jeceshahay raaxo iyo caado. Waxay doorbidaa waxa ay hore u taqaan, xitaa haddii ay waxyeello leeyihiin. Taasi waa sababta ay adagtahay in la jebiyo caadooyin xun.

Isbeddel dhab ah ma yimaado hal go’aan, balse wuxuu yimaadaa:

go’aan yar oo joogto ah

ficil maalinle ah

dulqaad iyo adkaysi

Qofka barta sida caado cusub loo dhiso, wuxuu bartay furaha isbeddelka.

2.5 Maskaxda Dhibanaha vs Maskaxda Mas’uulka

Waxaa jira laba aragti oo waaweyn:

Maskaxda dhibanaha: mar walba eedeysa duruufaha, dadka kale, ama nasiibka.

Maskaxda mas’uulka: qaadata masuuliyadda wixii ay beddeli karto, kana shaqeysa xal.

Isbeddelka dunida laguma dhiso eedeyn joogto ah, balse waxaa dhisa dad mas’uul ah oo aqoonsan awooddooda.

2.6 Barashada iyo Isbeddelka Maskaxda

Maskaxda aadanaha waa mid la tababari karo. Wax barashadu ma istaagto marka la dhammaysto dugsi ama jaamacad; waa hab nololeed. Qofka joojiya barashada, wuxuu joojiyaa koritaanka.

Isbeddelka maanta wuxuu u baahan yahay:

barasho joogto ah

la qabsasho

furfurnaan

Qofka aqoonta jecel waa qof u diyaarsan isbeddel.

2.7 Maskax Furan iyo Hoggaamin

Hoggaamiyaha dhabta ah ma aha kan dadka xukuma, balse waa kan fahamsan maskaxda bini’aadamka. Hoggaamiye leh maskax furan:

- ❖ wuu dhageystaa
- ❖ wuu baranayaa
- ❖ wuu isbedelayaa

Hoggaamintu waxay ka bilaabataa is-hoggaamin: qofka naftiisa hoggaamiya, wuxuu awoodaa inuu kuwo kale hanuuniyo.

2.8 Maskaxda: Xarunta Isbeddelka Dhammaan

Isbeddel kasta oo run ah wuxuu ka bilaabmaa meel aan la arki karin maskaxda. Dad badan waxay u maleynayaan in isbeddelku ka yimaado duruufo dibadeed: shaqo cusub, deegaan cusub, ama hoggaan cusub. Laakiin taariikhda iyo waayo-aragnimadu waxay muujinayaan in duruufahaas oo dhan ay raacaan isbeddel maskaxeed**.**

Maskaxdu waa sida muraayad; sida aad u nadiifiso ayay kuu muujisaa dunida. Haddii muraayadda fikirku qalloocan tahay, aragtida dunidu sidoo kale way qallooci doontaa. Qofka maskaxdiisu xaddidan tahay, xitaa marka fursad la siiyo, ma arki karo.

Isbeddelka ugu horreeya ee qofka laga rabo ma aha ficil, balse waa **faham**.

2.9 Sida Fikraduhu u Dhismaan

Fikraduhu ma dhashaan mar kaliya. Waxay ku dhismaan:

- ❖ waxa aan maqallo
- ❖ waxa aan aragno
- ❖ waxa nala baray

- iyo waayo-aragnimadii hore

Bulsho kasta waxay leedahay fikrado wadaag ah (collective mindset). Haddii fikradahaas ay xaddidan yihiin, qofka ku dhex nool wuxuu si fudud u qaadanayaa xadkaas, isaga oo aan ogaan.

Tusaale ahaan, qof ku koray jawi leh “lama sameyn karo” wuxuu u arkaa hal-abuurka mid khatar ah. Laakiin qof ku koray jawi dhiirrigeliya isku dayga, khaladku uma aha ceeb, balse waa cashar.

2.10 Qaladka Ugu Weyn ee Dadku Galaan

Qalad weyn oo caadi ah waa in dadka ay isku dayaan inay beddelaan noloshooda iyagoo aan beddelin fikradooda. Waxay rabaan natiijo cusub, balse waxay ku shaqeynayaan maskax hore.

Isbeddel dhab ah wuxuu u baahan yahay:

- In la aqoonsado fikradaha xun
- In la su’aalo runnimadooda
- In lagu beddelo fikrado dhisaya

Tani ma aha hawl fudud, balse waa hawl lama huraan ah.

2.11 Cabsida iyo Sheekada Maskaxda

Maskaxdu waxay qofka la hadashaa mar walba. Hadalkaas gudaha ahi waa kan go’aamiya kalsoonida ama cabsida. Marka maskaxdu tiraahdo: “Haddii aad fashilanto?” – qofku wuu istaagaa.

Cabsidu ma aha cadaw dabiici ah; waa digniin. Laakiin dad badan waxay u beddelaan xukun. Qofka fahma maskaxdiisa wuxuu bartaa inuu weydiiyo:

Maxaan ka baqayaa dhab ahaan?

Ma xaqiiqo mise waa mala-awaal?

Maxaa dhici kara haddii aan isku dayo?

Su’aalahan ayaa jebiya awoodda cabsida.

2.12 Caadooyinka Maskaxda Lagu Dhiso

Maskaxdu waxay jeceshahay caado. Waxay u shaqeysaa sida muruq: waxa aad ku celceliso ayuu adkaaadaa. Caado walba ha fiicnaato ama ha xumaato waxay ka bilaabataa ficil yar oo soo noqnoqda.

Isbeddel waara:

Ma yimaado hal dhiirrigelin

Ma yimaado hal hadal

Wuxuu yimaadaa ficil yar oo joogto ah

Qofka fahma tan, wuxuu joojiyaa raadinta mucjiso degdeg ah.

2.13 Maskaxda Dhibanaha: Xabsi Aan La Arag

Maskaxda dhibanaha waa tan qofka ku qancisa inuusan awood lahayn. Waxay ku quudisaa:

- ❖ eedeyn
- ❖ cudurdaar
- ❖ sugitaan

Maskaxdaas waxay qofka ka dhigtaa mid sugaya in xaaladdu isbeddelayso, halkii uu isagu isbeddeli lahaa.

Buuggan wuxuu akhristaha ku dhiirrigelinayaa inuu ka baxo doorka dhibanaha una guuro doorka mas'uulka. Mas'uuliyaddu ma micnaheedu ma aha in qofku is eedeeyo, balse waa inuu aqoonsado awooddiisa wax beddelid.

2.14 Maskaxda Koraysa (Growth Mindset)

Maskaxda koraysa waa faham ku dhisan in kartida la horumarin karo. Qofka leh maskax koraysa:

wuu aqbalaa khaladka

wuu jecel yahay barashada

kama baqo tartanka

Tani waa maskaxda ay leeyihiin dadka saameynta ku yeesha dunida.

2.15 Layli Maskaxeed: Isbeddelka Bilowgiisa

Akhristaha waxaa lagula talinayaa inuu sameeyo layli fudud:

Qor saddex fikir oo ku celceliya maskaxdaada

Weydii: fikraddani ma i dhistaa mise way i xannibtaa?

Ku beddel fikir ka furan oo dhisaya

Layligan yar wuxuu noqon karaa bilow isbeddel weyn.

2.16 Hoggaaminta Nafta

Qofka naftiisa hoggaamiya waa qofka ugu horreeya ee u qalma inuu hoggaamiyo kuwa kale. Is-hoggaamintu waxay u baahan tahay:

- ❖ is-xakameyn
- ❖ is-qiimeyn
- ❖ iyo daacadnimo nafeed

Halkaas ayay ka bilaabataa hoggaaminta dhabta ah.

2.17 Gunaanad Cutubka 2

Cutubkani wuxuu caddeynayaa in maskaxdu tahay aaladda ugu weyn ee isbeddelka. Qofka fahma maskaxdiisa, wuxuu helayaa xorriyad uu ku doorto sida uu u noolaanayo.

Isbeddelka dunida ma bilaabmo meel fog; wuxuu ka bilaabmaa hal maskax oo go’aan qaadata.

CUTUBKA 3: HAMI, RIYO IYO UJEEDDO NOLOLEED

3.1 Hami Waa Maxay?

Hami ma aha riyo kaliya oo qalbiga ku jirta; waa rabitaan maskax iyo qalbi isku raaceen, kuna jihaysan ficil. Qof kasta wuxuu leeyahay riyooyin, balse qof walba ma laha hami. Farqiga u dhexeeya labadaas waa **go'aan iyo adkaysi**.

Riyadu waxay dhici kartaa xitaa adigoon dadaal gelin, balse hamigu wuxuu u baahan yahay dadaal joogto ah, dulqaad, iyo u heellan. Hami la'aan, riyadu waxay ku ekaanaysaa fikir qurux badan oo aan natiijo dhalin.

Bulshooyinka horumaray waxaa mideeya hal shay: dad leh hami ka weyn naftooda.

3.2 Riyooyinka: Bilowga Safarka.

Riyooyinku waa abuurka isbeddelka. Waxay ka dhashaan marka qofku arko wax ka wanaagsan waxa hadda jira. Hase yeeshee, riyo aan lahayn jihayn waa sida doon aan lahayn jihada dabayshu ka kaxayso.

Riyooyinka qaarkood waa kuwo qofku ka dhaxlo bulshada ama qoyska, halka qaar kalena ay ka yimaadaan dareen qoto dheer oo qofku ka qabo nolosha. Qofka doonaya nolol macno leh waa inuu kala saaraa:

riyada isaga u gaar ah
iyo riyada ay bulshadu ku riixeyso
Tani waa tallaabo muhiim ah oo lagu helo ujeeddo dhab ah.

3.3 Ujeeddo Nololeed: Sababta Aad U Jirto.

Ujeeddadu waa sababta ka dambeysa hamiga iyo riyada. Waa su'aasha weyn ee ah: **Maxaan u noolahay?** Dad badan waxay ku noolyihiin iyagoo aan waligood isweydiin su'aashan, taasina waxay keentaa nolol ku socota caado, ma aha doorasho.

Ujeeddo nololeed ma aha wax qof walba u muuqda si isku mid ah. Qaar waxay ka helaan adeeg bulsho, qaar aqoon, qaarna ganacsi, qaar kalena tarbiyad iyo tusaale-nololeed.

Marka qofku helo ujeeddadiisa, daalku wuxuu isu beddelaa macno, caqabadduna waxay isu beddeshaa imtixaan la gudbi karo.

3.4 Khaladaadka Caamka ah ee Laga Galo Hami iyo Riyo.

Dad badan waxay ku fashilmaan hamigooda sababo ay ka mid yihiin:

inay rabaan natiijo degdeg ah
inay ka baqaan fashil
inay ku mashquulaan isbarbardhigga dadka kale
ama inay bilaabaan iyagoo aan qorshe lahayn

Hamigu ma aha tartan lala galo qof kale; waa safar uu qofku la galo naftiisa.

3.5 Hami Xaddidan iyo Hami Ballaaran.

Hami xaddidan wuxuu ku egyahay dan gaar ah: lacag, magac, ama sumcad. Hamigaas wuu guuleysan karaa, balse inta badan waa mid degdeg u dhammaada.

Hami ballaaran wuxuu ka gudbaa nafta qofka, wuxuuna taabanayaa bulsho, jiil, ama mustaqbal. Hamiga noocan ah wuxuu leeyahay awood uu ku dhiso taariikh.

Buuggan wuxuu ku boorinayaa akhristaha inuu ka fekero hamiga uu u taagan yahay: ma mid kuu gaar ah baa, mise mid wax ku kordhinaya dunida?

3.6 Xiriirka u Dhexeeya Hami iyo Anshax.

Hamiga aan lahayn anshax waa khatar. Taariikhda waxay xustay dad hami weyn lahaa, balse anshax la’aan ku burburay. Anshaxu waa xuduudda ilaalisa in hamigu uusan noqon mid waxyeello leh.

- Hamiga saxda ah waa kan:
- ku dhisan daacadnimo
- ku saleysan adeeg
- aan ku dhisnayn dulmi

Qofka isku dara hami iyo anshax, wuxuu noqdaa mid lagu aamino hoggaamin.

3.7 Qorsheynta Hamiga.

Hami aan lahayn qorshe waa rajo kaliya. Qorshuhu wuxuu hamiga u beddelaa talaabooyin la fulin karo. Qorsheyn dhab ah waxay u baahan tahay:

yoolal cad

waqtiyeyn

qiimeyn joogto ah

Qorshuhu ma aha wax mar la qoro oo la illoobo; waa dukumeenti nool oo la cusbooneysiiyo.

3.8 Hami iyo Dulqaad.

Hamiga weyn wuxuu u baahan yahay waqti. Dad badan waxay ka quustaan inta aysan arkin natiijo degdeg ah. Laakiin taariikhdu waxay xustaa kuwa adkaystay xilli aan guul muuqan.

Dulqaadku ma aha sugitaan madhan; waa shaqo la wado xitaa marka natiijadu gaabis tahay.

3.9 Layli Nololeed: Helidda Ujeeddadaada.

Akhristaha waxaa lagu boorinayaa inuu ka jawaabo su'aalahan:

Maxaa iga xanaajiya marka aan arko dunida?

Maxaa aan ku farxaa marka aan sameeyo?

Maxay dadku igu qiimeeyaan?

Haddii aanan ka baqayn fashil, maxaan sameyn lahaa?

Jawaabaha su'aalahan ayaa iftiimin kara ujeeddada qofka.

3.10 Gunaanad Cutubka 3

Hamigu waa shidaalka, riyaduna waa sawirka, ujeeddaduna waa jihada. Marka saddexdan la isku waafajiyo, qofku wuxuu helayaa nolol macno leh.

Qofka leh hami iyo ujeeddo cad, ma luminayo jidkiisa xitaa marka caqabado yimaadaan. Isbeddelka dunida wuxuu ka bilaabmaa qof garanaya sababta uu u nool yahay.

CUTUBKA4: ANSHAXA IYO MAS'UULIYADDA

4.1 Anshax Waa Maxay?

Anshaxu waa tiirka ugu muhiimsan ee dhismaha qofka iyo bulshada. Waa nidaamka qiyamka hagaya waxa qofku sameeyo marka uusan jirin cid daawaneysa. Qof anshax leh ma aha mid ku tiirsan cabsi ama ciqaab, balse ku shaqeeya damiir.

Bulsho kasta oo anshax la'aan ku dhacda, xeerar badan ha lahaatee, way burburtaa. Anshaxu ma aha wax laga barto hadal keliya; waa wax lagu dhiso tusaale nololeed iyo ku celcelin maalinle ah.

4.2 Anshaxa Qofka iyo Anshaxa Bulshada.

Anshaxa bulshada kama sarreeyo anshaxa qofka. Bulsho wanaagsan waxay ka kooban tahay shakhsiyaad leh damiir shaqeynaya. Marka qofku yiraahdo "bulshadu waa sidaan," wuxuu iska fogeynayaa mas'uuliyadda saaran naftiisa.

Isbeddel bulsho ma yimaado haddii qof walba sugo qof kale. Wuxuu ka bilaabmaa qof aqoonsada in ficilkiisu yahay qayb ka mid ah sawirka weyn.

4.3 Mas’uuliyad: Culays Mise Sharaf?

Dad badan mas’uuliyadda waxay u arkaan culays. Laakiin mas’uuliyaddu waa sharaf. Waa aqoonsiga ah in ficilkaagu uu leeyahay cawaaqib, isla markaana aad door ku leedahay sida noloshu u ekaanayso.

Mas’uuliyaddu ma ahan in qofku qaado wax walba; waa inuu qaado waxa isaga quseeya. Qofka mas’uulka ah ma eedeeyo duruufaha, balse wuxuu raadiyaa xal.

4.4 Anshax La’aan iyo Burbur.

Taariikhda bulshooyin badan ayaa muujisay in burburku inta badan ka bilaabmo anshax la’aan. Markii daacadnimadu lunto, kalsooniduna jabto, bulshadu waxay gasho fawdo.

Anshax la’aan laguma saxo sharciyo keliya; waxaa lagu saxo:

- ❖ Tarbiyadda
- ❖ Tusaalaha hoggaanka
- ❖ Wacyigelin joogto ah

4.5 Hoggaamiye Anshax Leh.

Hoggaamiyaha dhabta ah ma aha kan awoodda haysta, balse waa kan mas'uuliyadda qaata. Hoggaamiye anshax leh:

- ❖ Ma musuqmaasuqo
- ❖ Ma dulmiyo
- ❖ Ma adeegsado awood si qaldan

Hoggaaminta noocan ah waxay dhistaa kalsooni, kalsooniduna waa saldhigga horumarka.

4.6 Anshax iyo Go'aan Qaadasho.

Go'aan kasta wuxuu leeyahay dhinac anshaxeed. Qofka mar walba doorta waxa fudud, xitaa haddii uu qaldan yahay, wuxuu si tartiib ah u duminayaa naftiisa iyo bulshadiisa.

